Ilaahay sareeye wuxuu yiri: Salaada waxaan u kala qaybiyey aniga iyo Adoonkayga laba nus, Adoonkayguna wuxuu i waydiistuu

Abii Hureyra Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey inuu ka maqlay Rasuulka nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee isagoo dhahaya: " Ilaahay sareeye wuxuu yiri: Salaada waxaan u kala qaybiyey aniga iyo Adoonkayga laba nus, Adoonkayguna wuxuu i waydiistuu leeyahay, hadii Adoonku dhoho: {mahadi Rabiga caalamiinta ayey u sugnaatay}, Ilaahay sareeye wuxuu oran: Adoonkaygaa iimahad naqay, haduu dhoho: {Allaha naxariista guud iyo tan gaarka leh}, Ilaahay sareeye wuxuu oran: Adoonkaygaa i amaanay, haduu dhoho: {Allaha iska leh amarka Maalinta Qiyaamaha}, Ilaahay sareeye wuxuu oran: Adoonkaygaa i sharfay,- marna wuxuu oran: Adoonkaygaa taladiisa ii dhiibtay-, haduu dhoho: {kaligaa ayaan caabudaynaa, oo kaligaa ayaan kaalmaysanaynaa }, Ilaahay sareeye wuxuu oran: taasi Aniga iyo adoonkaygay noo dhaxaysaa, adoonkayguna wuxuu i waydiistuu leeyahay, haduu dhoho: {nagu hanuuni jidka toosan, jidka kuwii aad u nicmaysay, hanana marin jidka kuwa aad u carootay iyo kuwa xaqa ka lumay}, wuxuu Ilaahay sareeye oran: taasi Aniga iyo Adoonkayga ayey naga dhaxaysaa, Adoonkayguna wuxuu i waydiistuu leeyahay."

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Muslim]

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay: in Ilaahay sareeye ku yiri Xadiis Alqudsiga: suurada faatixada ee salaada lagu akhriyo waxaan u kala qaybiyey aniga iyo Adoonkayga labo nus, nus anigaa leh, nusna isagaa leh Nuskeeda koobaad: waa mahad naq, amaan iyo Ilaahay oo la sharfo, Adoonkayga waxan ku abaal marin abaal marinta ugu khayr badan. Nuskeeda labaad: waa is bihin bihin iyo baryo, waan ka ajiibin wuxuu i waydiistona waan siin. Haduu dhoho qofka tukanaaya:{mahad oo shan waxay u sugnaatay Rabiga Caalamka }, Ilaahay wuxuu oran: wuu ii mahadnaqay adoonkaygu, haduu dhoho: {Allaha naxariista guud iyo tan gaarka ah leh}, Ilaahay wuxuu oran: wuu i amaanay adoonkaygu, waana i waynayey uuna ii qiray nicmooyinka aan ku galadaystay khalqigayga, haduu dhoho: {Allaha iska leh amarka maalinta qiyaamaha}, Ilaahay wuxuu oran: wuu i sharfay adoonkaygu, waana sharaf balaaran. Haduu dhoho: {Alahayow, Adaan ku caabudaynaa oo ku kaalmaysanaynaa}, Ilaahay wuxuu oran: taasi waxay u dhaxaysa aniga iyo adoonkayga. Nuska koowaad ee aayadu Ilaahay ayaa leh waana:(Adaan ku caabudaynaa), waana qirid Ilaahay loo qirayo Ilaahnimadiisa, iyo inuu ka ajiibay adoonka cibaadada, halkaasayna ku egtahay nuska Ilaahay leeyahay. Nuska labaad ee aayada, ee adoonku leeyhay: (Adiga oo kaliya ayaan ku kaalmaysanaynaa), waana Ilaahay oo gargaar la waydiisto, iyo Ilaahay oo u balan qaaday inuu kaalmaynayo. Haduu dhoho: {nagu hanuuni jidka toosan *, jidka ay mareen kuwaad u nicmaysay, ee aan ahayn kuwaad u carootay iyo kuwa xaqa ka lumay, Ilaahay wuxuu oran: taasi waa is bihin bihin iyo baryo adoonkayga ka timid, adoonkayguna wuxuu i waydiistuu leeyahay, waana ka ajiibay baryadiisa.

